# Macluumaad ku saabsan Språki

Mal til bruk for behandlingsansvarlig · GDPR art. 13 · Somali

# Informasjon til deltakerne

## Macluumaad ku saabsan Språki

[MUNICIPALITY] waxay isticmaashaa qalab dijitaal ah oo la yidhaahdo Språki. Waad isticmaali kartaa markaad baranayso af-Noorwiijiga. Halkan waxaan kuu sharxaynaa waxa ku dhacaya macluumaadkaaga.

### Waxa aan kaa kaydinno

- Magacaaga iyo magaca isticmaalaha
- Kooxda ama fasalka aad ku jirto
- Waxa aad ku samayso Språki: qoraallada aad qorto, hawlaha aad dhammayso, iyo natiijooyinkaaga
- Sawirrada iyo codadka aad adigu soo geliso

### Sababta aan u samayno

Waxaan u isticmaalnaa Språki inuu kaa caawiyo baridda af-Noorwiijiga. Macallinkaagu wuu arki karaa waxaad samaysay, wuxuuna kaa caawin karaa sii socodka.

Waxaan tan u samaynaa maxaa yeelay degmadu waxay leedahay waajib sharci ah oo ah inay ku siiso waxbarasho.

Xeerka taas oggolaanaya waa qodobka 6(1)(e) ee xeerka ilaalinta xogta ee Yurub (GDPR): fulinta awood rasmi ah.

### Garaadka macmalka ah

Språki wuxuu isticmaalaa garaadka macmalka ah (AI). Micnaheedu waa in kombiyuutar akhriyo waxaad qorto oo ku siiyo jawaabo iyo talo. Waa muhiim inaad ogaato:

- AI-gu ma yaqaan cidda aad tahay. Waxaan dirnaa qoraalkaaga, laakiin ma dirno magacaaga, iimaylkaaga, ama iskuulka aad dhigato.
- Waxaad qorto looma isticmaalo tababarka AI-ga. Taas waa heshiis qoraal ah oo lala galay shirkadaha sameeya AI-ga.
- AI-gu wuu khaldami karaa. Jawaabuhu inta badan waa wanaagsan yihiin, laakiin mar walba sax ma aha. Weydii macallinkaaga haddii arrintu muhiim tahay.
- Macallinka ayaa go’aansada, ma aha AI-ga. AI-gu wuxuu ku siiyaa tababar iyo talo. Buundo ma dhigo, heerkaagana ma go’aamiyo.

## Ha qorin waxyaabo xasaasi ah

Waa inaadan qorin caafimaadkaaga, diintaada, siyaasadda, ama arrimo kale oo gaar ah oo xasaasi ah markaad tababaranayso.

Uma baahnid taas si aad u barato af-Noorwiijiga. Haddii aad su’aalo ka qabto arrimahaas, la hadal macallinkaaga.

## Meesha macluumaadku ku jiro

Macluumaadkaaga waxaa lagu kaydiyaa server ku yaal Jarmalka, taasoo ah gudaha Yurub.

Marka AI-ga la isticmaalo, qoraalkaaga waxaa loo diraa shirkado laga yaabo inay ka baxsan yihiin Yurub — tusaale ahaan Mareykanka. Waxaa loo diraa iyada oo aan magacaaga la dirin. Waxaa jira heshiisyo ku siinaya isla ilaalinta jirta Yurub.

## Muddada aan kaydinno

Macluumaadka waxaan haynaa inta aad ka mid tahay ardaydayada, ka dibna [NUMBER] [PERIOD]. Kadib waan tirtirnaa.

## Xuquuqdaada

Waxaad xaq u leedahay inaad:

- Aragto macluumaadka aan kaa hayno
- Saxdo macluumaad qaldan
- Tirtirto macluumaadkaaga
- Hesho macluumaadkaaga fayl aad qaadan karto — adigu waad ka soo dejisan kartaa gudaha Språki
- Cabasho gudbiso haddii aad u malayso inaan wax qaldan samaynayno

## La hadal macallinkaaga, ama nala soo xidhiidh:

**[MUNICIPALITY]**
Iimayl: **[EMAIL]**
Telefoon: **[PHONE]**
Mas’uulka ilaalinta xogta: **[DPO]**

Haddii aad u malayso inaan si khaldan u maamulno macluumaadkaaga, waxaad cabasho u gudbin kartaa hay’adda ilaalinta xogta ee Norway, Datatilsynet (datatilsynet.no).